

‘Weerarka Madaxtooyada Ridada ee Muqdisho’

04 Jamadul Awal 1444H (28 Novembar 2022) – Iyadoo laga duulayo amarka Allaah ee ah in lala dagaalamo cadawgiisa, lana difaaco Diinta Islaamka, waxay ciidamada Mujaahidiintu xalay fiidkii weeraro qorshaysan ku qaadeen xarumaha ridada ee ku yaalla magaalada Muqdisho, gaar ahaan xarunta madaxtooyada iyo agagaarkeeda. Weerarada oo isugu jira Istish-haadiyo iyo inghimaasiyo ayaa si gaar ah loola bartilmaameedsaday qaybta bari ee Madaxtooyada ridada magaalada Muqdisho halkaas oo ay ku yaallaan dhismayaal dhawr ah oo ay ku dhuumaalaystaan mujrimiinta ugu waaweyn madaxda ridada ah.

Allaah fadligiis, ciidamada Mujaahidiinta ah ee fuliyay weerarada ayaa si xirfadaysan oo khibrad iyo xeelad ku dheehan tahay uga gudbay dhamaan jid-gooyooyinka faraha badan ee uu cadawgu dhigay wadooyinka Muqdisho, waxay gaareen goobihii yoolkoodu ahaa, waxayna madaxdii ridada oo khabaar-moog ah ku billaabeen rasaasta. Mujaahidiinta weerarka qaaday oo ka tirsan katiibada Istish-haadiyiinta ayaa dagaal kula wareegay xarumaha cadawga gaar ahaan halka loo yaqaano Villa Rosa. Mujaahidiinta ayaa sidoo kale u tallaabay dhanka madaxtooyada halkaas oo ay ku garaaceen madaafiic iyo rasaas culus.

Weerarada ayaa socda muddo ka badan 18 saacadood. Ciidamada Mujaahidiintuna waxay fashiliyeen isku dayo farabadan oo uu cadawgu doonayay inuu kusoo soo ceshado gacan ku haynta dhismayaasha. Waxaa jira khasaare xooggan oo isugu jira dhimasho iyo dhaawac oo soo gaaray madaxda ridada oo ay kamid yihiin wasiiro, wasiir ku xigeeno, wasiir-dawladaal, saraakiil ciidan iyo askar intaba. Ciidamada Mujaahidiinta ayaa gacanta ku dhigay hub iyo saanad milatari oo ay ka ghaniimaysteen malleeyshiyadii ridada ee ku fashilmay duullaanadii ay soo qaadayeen xalay ilaa xilligan oo duhur ah. Waxayna si buuxda gacanta ugu hayaan dhismayaal ku teedsan Madaxtooyada ridada.

Weerarka Mujaahidiinta ayaa sababay inuu baaqdo kulan muhiim ahaa oo ay u ballansanaayeen xubnaha labada gole ee dawaqiida ah ee sharci dejiyayaasha iskugu yeera. Sidoo kale madaxweynaha kooxda ridada, murtad Xassan Sheekh Maxamuud, ayaa lagala cararay madaxtooyada isagoo loola baxsaday dhinaca garoonka diyaaradaha Muqdisho. Waxaan u mahad celinaynayaa Allaah Subxaanahu watacaalaa annagoo weydiisanayna inuu sugo geesiyada Islaamka ee naftooda u huraya sidii ay u ciqaabi lahaayeen cadawga ridada ah ee u taagan la dagaalanka Shareecada Islaamka, una ololeynaya gaalnimada iyo dhaqamada gurraacan ee qawmu-luudnimada ah.

Faahfaahin intaan ka badan waxaan soo gudbin doonaa xilliyada nagu soo aadan Insha-Allaah.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay u dagaallameysaa dhawritaanka badqabka Ummadda Muslimka ah, hirgelinta Shareecada Islaamka iyo inay dhamaan dhulalka Muslimiinta ka xoreyso gaalada iyo murtadiinta dabadhilifka u ah. Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay mar kale ku celinaysaa dalabkii ahaa in dadka Muslimiinta ah ay ka dheeraadaan saldhigyada, xarumaha iyo xafiisyada cadawgu ku leeyihiin degmooyinka iyo deegaanada ay xoogga uga haystaan ummada Soomaaliyeed ee Muslimka ah.

Waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ballan ku qaaddeysaa inay sii wadi doonto Jihaadka ka dhanka ah isbahaysiga caalamiga ah ee saliibiyiinta iyo dabadhilifyadooda murtadiinta ah ilaa ay geyiga Soomaaliyeed ka saareyso cadowga hororka ah ee ku soo duuley, iyo illaa diinta dhamaanteed ay Allaah keliya u sugnaaneyso. Allaah, subxaanahu watacaalaa, wuxuu yiri:

وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّى لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ الدِّينُ لِلَّهِ فَإِنْ انْتَهَوْا فَلَا عُدْوَانَ إِلَّا عَلَى الظَّالِمِينَ [البقرة:193]



﴿ وَاللَّهُ الْعَزِيزُ الرَّسُولُ وَالْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾